Qofka dadka ugu mudan shafaacadeyda Naalinta Qiyaame, waa Qofka qalbigiisa ama naftiisa si ikhlaas ah uga yiraahda laa Ilaaha ilaa Allaah

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaa lagu yiri: Rasuulkii Ilaahayow dadka yaa ugu mudan shafaacadaada Maalinta Qiyaame? wuxuu yiri Rasuulkii Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: "waxaan filayey Abaa Hureyrow inaanu i waydiinayn xadiiskaan qof adiga kaa horeeya markaan arkay sidaad ugu dadaalaysid Xadiiska, Qofka dadka ugu mudan shafaacadeyda Naalinta Qiyaame, waa Qofka qalbigiisa ama naftiisa si ikhlaas ah uga yiraahda laa Ilaaha ilaa Allaah".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofka ugu mudan shafaacadiisa Maalinta Qiyaame waa qofka qalbigiisa si ikhlaas ah uga yiraahda: "Laa Ilaaha Ilaa Allah" majiro Ilaah xaqa lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn, waana inuu yahay mid ka nabad galay shirkiga iyo is tus tuska.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3414